

# Barnaamijka Qoyska Guulaysta

Meey 2008

Barnaamijka Qoyska Guulaysta wuxuu adeegyo siiyaa qoysaska dakhligoodu hooseeyo. Adeegyaddaas waxaa ka mid ah kuwan soo socda:

- Taageero lacageed, oo sidoo kale loo yaqaan Taageeradda Ku-meelgaadhka ah ee Qoyska (Temporary Assistance for Families -TAF)
- Ka caawinta dadka waawayn inay shaqo helaan.
- Siinta taageero adeeg shaqo, tabobar, hawlo shaqo, iyo waxbarasho.

Barnaamijku wuxuu ka caawiyaa qoysaska inay bartaan xirfado cusub, in awoodooda imiku dhisanto, waxaanay caruurta ku hayaan guryahooda.

Si aad caawimo uga hesho Barnaamijka Qoysaska Guulaysta, waa in qoysku ugu yaraan guriga ku haystaan ilmo da'diisu ka yar tahay 18 jir. Ilmahani wuxuu noqon karaa mid aan wali dhallan. Ilmuhu wuxuu la noolaan karaa waalid ama qaraabo. Ilmuhu waxaa sidoo kale laga yaabaa inuu la noolaado qof maxkamadi u magacowday inuu daryeelo, sida ilaaliye, shaqaale kiis, dhowre, ama gacan ku haye.

Qoysasku sidoo kale waxaa laga yaabaa in dakhligooda iyo hayntoodu hoosayso. Dakhliga dhamaan xubnaha qoyska waa la xisaabinayaa. Noocyo ka mid dakhliga iyo hayntaada kale lama tiring doon, kuwaas waxaa ka mid ah:

- Guriga qoysku ku nool yahay
- Hantida qiimaheedu ka yar yahay \$2,000
- Baabuurta
- Qalabka guriga, waxyaabaha gaarka qof u leeyahay, iyo qalabka qaarkood
- \$90 oo lagu daray 60% waxa aad kasbato

Qoysasku waxaa laga yaabaa inay helaan taageero lacageed inta ay shaqo raadsanayaan haddii wali ay buuxinayaan shuruudaha barnaamijka. Shuruudahan waxaa ka mid ah la shaqaynta Barnaamijka Taageeradda Caruurta. Qoysasku waxay TAF heli karaan 60 bilood waligood. Qoysaska qaata TAF waxaa sidoo kale laga yaabaa inay helaan taageero caafimaad iyo daryeelo ilmo.

Heerka taageeradda lacageed waxay ku xidhan tahay dakhliga qoyska. Waxay sidoo kale ku xidhan tahay degmada qoysku ku nool yahay. Shaxdan soo socota ayaa muujinaysa taageerada lacageed ee ugu saraysa ee qoysku heli karo.

<b>Bixinta Taageero Lacageed</b>				
Xajmiga Qoyska	Degmadda	Degmadda Kharashkeedu Sareeyo	Degmadda Dadkeedu badan yahay	Degmooykina Kharashkooda-dadkoodu badan yahay

1	\$224	\$229	\$241	\$267
2	\$309	\$314	\$326	\$352
3	\$386	\$391	\$403	\$429
4	\$454	\$459	\$471	\$497
5 ama ka badan	Ugu dar \$61qof kasta oo soo kordha			

Qoysasku waxay heli karaan noocyada kale ee adeegyada taageeradda si ay ugu diyaargaroobaan inay shaqeeyaan. Waxaa laga yaabaa inay helaan adeegyadan taageerada ah inta ay qaadanayaan taageeradda lacageed. Adeegyadani waxay socon karaan ilaa sanad kadib marka ay joojiyaan qaadashadda taageerada lacageed. Qoysasku waxaa laga yaabaa inay helaan adeegyo iyo taageero ay ka mid yihiin kuwan soo socdaa:

In lagaa caawiyo sidaad shaqo u heli lahayd ama u haysan lahayd

Waayo aragnimo shaqo

Adeegyada waxbarashada curyaanimadda, daroogadad ama dhibaatooyinka alkahoolka, ama rabshadaha guriga.

Adeegyadda caawimada wax akhriska iyo xisaabta

Adeegyada caafimaadka maskaxda

Daryeelka caafimaadka jidhka

Ka caawinta la tacaalida curyaanimada

Caawin xaga barbaarinta ubadka ah (waalidnimada)

Caawin siddi aad u heli lahayd ilkaha la gashadd, muraayadda indhaha, waxyaabaha maqalka caawiya.

Tabobarka shaqadda

In lagaa caawinayo sidii aad u heli lahayda GED ama u baran lahayd luuqada Ingiriiska

In lagaa caawiyo sidaad u gaadhi lahayd meelaha s

Dhar xidhashadda

Ka caawinta waxyaabaha aasaasiyaadka ah

Kharashaadka guurista ee shaqada la xidhiidha

Dadka waawayni waa inay sameeyaan mid ka mid ah kuwan soo socda si tageero lacageed ay ugu helaan qoysaskooda:

Waa inay shaqeeyaan ama ku jiraan hawlo shaqo

Ku jiraan barnaamijyo si ay gacan uga gaystaan yaraynta caqabadaha shaqadda

Daryeelaan ilmo ka yar 6 bilood jir

Daryeelaan xubin qoyska ka tirsan oo curyaan ah

Dadka aan looga baahnayn inay shaqo helaan ama ku jiraan hawlo shaqo waa inay soo codsadaan adeegyadan.

## Codsiyadda

[Guji halkan](#) si aad u hesho codsiyadda adeegyadda.

Adeegyada kale, ama si aad u hesho Xafiiska Arimaha Bulshadda iyo Dhaqancelinta ama Access Point-ka kuugu dhow, isticmaal xidhiidhada ku yaal dhamaadka boggan.

[Ku noqo bogga Hoyga EES](#)

Waxaa bogga wax lagu daray: Oktoobar 20, 2008